



Orientation to Ontario

SII WADISTA WAXBARASHADA IYO TABABARKA LUUQADA

SII WADISTA WAXBARASHADA

Sii wadista waxbarashada, sidoo kalena loo yaqanao waxbarashada dadka waawayn, waxaa ku jira dhammaan noocyada koorsooyinka dadka waawayn qaataan kadib marka ay dhammeeyaan waxbarashada rasmiga ah ee jaamacada ama kuleejka. Koorsooyinka ayaa kaa caawinaaya inaad hormariso xirfadaha aad xiiseynayso (sida waxyaabaha aad danayso) ama inaad gaarto yoolalka dhanka shaqada (sida xirfadaha kumbuyuutarka). Sii wadista waxbarashada waxaa bixiyaa gudiyada dugsiyada, kuleejyada iyo jaamacadaha, oo la dhigto badanaa fiidkii ama maalmaha fasaxa asbuuca.

- Si aad u hesho gudiga dugsiyada ee deegaankaaga, booqo ontario.ca ama findlink.at/schoolinfo
- Si aad u hesho kuleejyada iyo jaamacadaha Ontario, booqo ontario.ca ama ontariocolleges.ca
- Si aad wax uga barato kor u qaadista xirfadahaaga akhriska, wax qorista iyo xisaabta, booqo ontario.ca ama findlink.at/adultlearn
- Haddii aad ka wayn tahay 18 sano aadna doonayso inaad hesho shahaadada dugsiyada sare, waxaad ka heli kartaa barnaamij bilaash ah oo ka shaqeeya deegaankaaga barta ontario.ca ama findlink.at/OSSD

Xarunta Waxbarashada Madaxa Banaan ayaa bixisa koorsooyinka badan ee dugsiyada sare ee oonlaynka ah. Si aad u hesho xog dheeraad ah, booqo ilc.org

TABABARKA LUUQADA

Gudiyada dugsiyada, kuleejyada iyo wakaaladaha bulshada ayaa baxsha casharada luuqada ee dawladu maalgeliso oo lagu baxsho Ingiriis iyo Faransiis. Jaamacadaha iyo dugsiyada luuqada ee gaarka loo leeyahay ayaa sidoo kale baxsha koorsooyinka luuqada, laakiin koorsooyinka waa lacag.

Waxaa jira noocyada badan ee koorsooyinka luuqada oo laga heli karo Ontario. Liiskan waxaad ka helaysaa noocyada kaladuwan ee koorsooyinka luuqada:

- English Literacy Development (ELD)
- English and French as a Second Language (ESL and FSL)
- Language Instruction for Newcomers to Canada (LINC)
- Occupation-specific Language Training (OSLT)
- Enhanced Language Training (ELT)
- Cours de langue pour les immigrants au Canada (CLIC)
- Specialized Language Training (SLT)

Si aad u hesho qeexitaanka noocyada kaladuwan ee casharada luuqada ee la heli karo, booqo inmylanguage.org ama findlink.at/ESLprogram

Si aad u hesho casharka luuqada ee deegaankaaga, booqo Waaxda Soo Galootiga ee Ontario oo aad ka helayso www.ontarioimmigration.ca ama findlink.at/onlinetool

Funded by / Financé par

1-855-626-0002

<https://orientationontario.ca>



Si aad xog uga ogaato Waxbarashada Guriga ee LINC (tababarka luuqada oo aad samayn karto adoo guriga jooga) booqo canada.ca ama findlink.at/homestudy

Si aad xog uga ogaato tababarka luuqada ee gaarka u ah shaqada (OSLT) ee lagu baxsho kuleejyada Ontario, booqo co-oslt.org

QIIMAYNTA LUUQADA

Koorsooyinka luuqada qaarkood ayaa u baahan qiimeynta xirfadaha luuqada kahor intaan lagu diiwaan gelin. Waydii la taliyahaaga dejinta inuu kugu hago xarunta qiimaynta ee deegaankaag.

Si aad u hesho wakaaladii dib u dejinta oo kuu dhow, booqo www.settlement.org/findhelp

Xog badan ka ogoow qiimaynta luuqada oo laga heli karo language.ca ama findlink.at/clb-assess



MA OTAHAAY?

Loo shaqeeyaal badan ayaa leh barnaamijyada hormarinta xirfada si looga caawiyo shaqaalaha inay baxshaan qarashka sii wadista waxbarashada. Waydii maamulehaaga ama waaxda shaqaalaha dookhyada aad heli karo

